

18. Ee bixiya Xoolihiisa si uu u daahirnoqdo.

الَّذِي يُؤْتِي مَالَهُ يَتَزَكَّىٰ ﴿١٨﴾

19. Ruux wax ugu nicmeeyayna oo abaalmarinna ma uusanjirin.

وَمَا لِأَحَدٍ عِنْدَهُ مِنْ نِعْمَةٍ تُجْرَىٰ ﴿١٩﴾

20. Ee Wuxuu u bixin dar Eebaha sarreeya.

إِلَّا ابْتِغَاءَ وَجْهِ رَبِّهِ الْأَعْلَىٰ ﴿٢٠﴾

21. Wuuna raalli noqoonana Ruuxaasi.

وَلَسَوْفَ يَرْضَىٰ ﴿٢١﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay in camalka Dadku kala duwanyahay, Ruuxii toosana Jidka wanaagsan loo fududayn, kii beeniya oo qalloocdana Jid xun uu qaadi, Aakhariyo Addunna Eebaa iska leh, ee waa in laga digtoonaado xumaanta, wanaagga iyo dar Eebe wax u bixintana lugu dadaalo.

Jaabir Bini Cabdiillaahi waxaa Laga wariyay inuu Yidhi: Rasuulkii Eebow ma waxaan u Camal-Falaynaa Amar la Dhammeeyay mise Amar Aannu Cosboonayn? Markaasuu Yidhi: «Amar la Dhammeeyay» markaasuu yidhi Suraaqo: Camalku maxaa weeye marka? Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe «ha yeelee» markaas wuxuu yidhi: «Ruuxii Camal-Faliba waxaa loo Fududayn camalkiisa». Waxaa wariyay Muslim. Al-Layl (1-21).

## Suurat Ad-Duxaa

## سُورَةُ الضُّحَىٰ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Barqinka.

وَالضُّحَىٰ ﴿١﴾

2. Iyo Habeenku markuu xasilo (Madoobaado).

وَاللَّيْلِ إِذَا سَجَىٰ ﴿٢﴾

3. Inaan Eebe kaa tagin Nabiyouw kuuna cadhoonin.

مَا وَدَّعَكَ رَبُّكَ وَمَا قَلَىٰ ﴿٣﴾

4. Aakharana kaaga khayr badan Ad-duunka.

وَالْآخِرَةُ خَيْرٌ لَّكَ مِنَ الْأُولَىٰ ﴿٤﴾

5. Eebaana ku siindona (wanaag) waadna raalli noqon.

وَلَسَوْفَ يُعْطِيكَ رَبُّكَ فَتَرْضَىٰ ﴿٥﴾

6. Miyuusan ku helin Eebahaa Adigoo Agoon ah oosan ku dhawaynin.

أَلَمْ يَجِدْكَ يَتِيمًا فَآوَىٰ ﴿٦﴾

7. Miyuunase ku helin Adigoo baadi ah oosan ku hanuuninin.

وَوَجَدَكَ ضَالًّا فَهَدَىٰ ﴿٧﴾

8. Miyuunase ku helin Adigoo caydhi ah oosna ku hodminin (kuu waxyooinin).
9. Ee Agoonta ha xoogin (hana dhibin).
10. Ka wax su'aalina ha canaan.
11. Nicmada Eebahaana ka sheeke (ku mahadi).

وَوَجَدَكَ عَائِلًا فَأَغْنِي ﴿٨﴾

فَأَمَّا الْيَتِيمَ فَلَا تَهْجُرْ ﴿٩﴾

وَأَمَّا السَّائِلَ فَلَا تَنْهَرْ ﴿١٠﴾

وَأَمَّا بِنِعْمَةِ رَبِّكَ فَحَدِّثْ ﴿١١﴾

Suuraddani waa Suurad wayn, sida suuradaha Quraanka ee kalaba, waxayna ku soo dagtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) Xanuunsaday Gaaladuna dheheen Maxammad shaydaankiisii wuu ka tagay iyagoo ula jeeda Malaku-Jibriil oo waxyiga dib ula yar dhacay, Eebana wuxuu Suuradda ku sheegay nimooyin uu Nabiga siiyay, iyo Agoonka inaan la dhibin, kuwa dhibaataaysanna ee wax warsanna aan la canaan, Nicmada Eebana lagu mahadiyo.

Rasuulkuna wuxu yidhi Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee: «Hodontinnimadu ma aha xoolo Badni, Laakin Hodontinnimadu waa Hodonnimada Nafta». Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Ad-Duxaa (1-11).

## Suurat Ash-Sharx

## سُورَةُ الشَّرْحِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Miyaannaan kuu waasicinin Laabta (kuu nuurinin).
2. Oonnaan kaa dajinin culayskii.
3. dhabarka kaa cusleeyay.
4. Miyaannaan kor yeelin magacaaga (xusiddaada).
5. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd (faraj).
6. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd.
7. Ee markaad Salaadda dhammayso isku dhib (Samo fal).

أَلَمْ نَشْرَحْ لَكَ صَدْرَكَ ﴿١﴾

وَوَضَعْنَا عَنَّا وِزْرَكَ ﴿٢﴾

الَّذِي أَنْقَضَ ظَهْرَكَ ﴿٣﴾

وَرَفَعْنَا لَكَ ذِكْرَكَ ﴿٤﴾

فَإِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ﴿٥﴾

إِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ﴿٦﴾

فَإِذَا فَرَغْتَ فَانصَبْ ﴿٧﴾